# Alberta

**Was** saxaafadeed

# Khudbadda taajka: Hore u socodka Alberta iyadoo la gaarsiinayo natiijooyin.

Oktoobar 23, 2025

---

Dowladda Alberta waxay diiradda saartay ficil iyo u beddelidda qorshayaasha natiijooyin dhab ah oo ay shacabka Albertans ku tiirsanaan karaan.

Khudbadda Taajka ee Dayrta 2025 waxay muujinaysaa jihada cad ee kalfadhigan sharcidejinta: ilaalinta xorriyadaha, horumarinta masuulka ah ee kheyraadka dabiiciga ah ee ay Alberta ku naaloonayso, xoojinta adeegyada asaaska u ah bulshada, iyo dhisidda barwaaqo waarta oo loo wada siman yahay dhammaan dadka Alberta.

"Shacabka Alberta si cad ayay u muujiyeen mudnaantooda, dowladduna way ka jawaabaysaa. Inta lagu jiro kalfadhigan sharci-dejinta, waxaan u rogeynaa mudnaantaas ficilyo dhab ah siyaasado xoojinaya daryeelka caafimaadka, hagaajinaya fasallada waxbarashada, ilaalinaya xorriyadaha, iyo horumarinaya mashaariic qaran-dhisid ah oo xoojinaya doorka Alberta ee ah awoodda dhaqaalaha ee mustaqbalka Kanada."
*Danielle Smith, Gudoomiyaha Gobolka*

""Maaddaama Golaha Sharcidejinta ee Alberta uu bilaabayo kalfadhigiisa Dayrta, waxaan ku faraxsanahay inaan guto waajibaadkayga Dastuuriga ah oo aan jeediyo Khudbadda Taajka. Toddobaadyada soo socda, waxaan ku kalsoonahay in wakiillada shacabka ee la doortay ay si daacadnimo, naxariis iyo ixtiraam isu dhoweyn ah u wada shaqeyn doonaan si ay u abuuraan nolol ka wanaagsan dhammaan dadka Alberta."
*Lt.-Gov. Salma Lakhani*

Khudbadda Taajka waxay calaamad u ahayd bilowga kalfadhiga labaad ee Golaha Sharci-dejinta ee 31-aad. Inta lagu jiro kalfadhigan cusub ee sharci-dejinta, dowladda Alberta waxay raaci doontaa dhowr mudnaan oo muhiim ah sida lagu sheegay Khudbadda:

**Xiriirka Federaalka iyo Maraykanka**
Dowladda Alberta waxay sii wadi doontaa difaacidda iyo fulinta awoodaha dastuuriga ah ee gobolka, si loo gaaro go'aanno waafaqsan mudnaanta iyo qiyamka dadka Alberta. Gobolka wuxuu la shaqayn doonaa dawladaha kale, qabiilooyinka First Nations, iyo warshadaha si masuuliyad leh loogu horumariyo kheyraadka dabiiciga ah ee gobolka, iyadoo la sii wado wadahadallo ixtiraam leh iyo diblumaasiyad ku dhisan xiriirka u dhexeeya Alberta iyo Maraykanka.

Classification: Protected A

**Dhaqaalaha iyo Miisaaniyadda**
Dowladdu waxay sii wadi doontaa ilaalinta dhaqaalaha gobolka iyo maaliyaddiisa si looga hortago isbeddellada qiimaha tamarta, cunaqabataynta Maraykanka, iyo hanjabaadaha kale ee dibadda. Taageero ayaa la siin doonaa dadaallada lagu kala duwayo dhaqaalaha, halka kharashaadka lagu xakameyn doono tilmaamo sharciyeed oo maaliyadeed. Qorshaha lagu kordhinayo Sanduuqa Kaydka Alberta Heritage Savings Trust Fund ilaa in ka badan $250 bilyan marka la gaaro sanadka 2050, wuu soconayaa oo waa la fulinayaa.

**Dadka Cusub iyo Kaabayaasha Dhaqaalaha**
Dadka cusub ee soo galaya gobolka Alberta waxaa lagu soo dhaweyn doonaa si diirran, iyagoo qayb ka noqonaya nolosha bulshada, dhaqanka, iyo dhaqaalaha gobolka. Gobolka wuxuu raadin doonaa in uu yeesho awood dheeraad ah oo ku saabsan siyaasadda socdaalka, isagoo qaadanaya hab waara oo ka duwan siyaasadaha federaalka ee hadda jira. Dowladdu waxay si xeel dheer u maalgashan doontaa shabakadaha gaadiidka, kaabayaasha kale, iyo adeegyada bulshada ee cadaadiska ku jira sababo la xiriira kororka dadka.

**Waxbarashada**
Maalgelin ballaaran ayaa la siin doonaa nidaamka waxbarashada si loo daboolo kororka degdega ah ee in ka badan 90,000 arday saddexdii sano ee la soo dhaafay. Gobolka wuxuu ballan qaaday $8.6 bilyan si loo dhiso 130 dugsi iyo in la furo 200,000 goobood oo cusub oo waxbarasho ah guud ahaan gobolka. Maalgelintani waxay xoojin doontaa fasallada, macallimiintuna waxay heli doonaan taageerooyin ay ardayda uga caawiyaan in ay gaaraan awooddooda buuxda.

**Daryeelka Caafimaadka**
Nidaamka daryeelka caafimaadka ee Alberta wuxuu geli doonaa marxalad cusub. Maalgashiyo joogto ah ayaa lagu sameyn doonaa daryeelka aasaasiga ah, ka hortagga cudurrada, daryeelka sii socda, caafimaadka maskaxda, iyo taageerada naxariista leh. Tani waxay u oggolaan doontaa dadka Alberta inay si dhakhso ah oo kalsooni leh u helaan daryeelka ay u baahan yihiin waqtigooda iyo meeshii ay joogaan.

**Caddaaladda iyo Ammaanka Dadweynaha**
Xuquuqda iyo xorriyadda muwaadiniinta Alberta waa la ilaalin doonaa iyadoo maalgashiyo istiraatiiji ah lagu samaynayo booliska iyo amniga guud.

**Madax-bannaanida**
Siyaasadda taageerta Alberta oo xooggan, xor ah, isla markaana madax-bannaan gudaha Kanada mideysan ayaa sii ahaan doonta tiirka ugu weyn ee qorshaha sharci-dejinta ee dowladda. Waxaa si adag looga soo horjeesan doonaa siyaasad kasta oo federaal ah oo halis ku ah barwaaqada dhaqaale ee gobolka iyo dalka guud ahaan.

**Was** saxaafadeed

**Macluumaad la Xiriira**

- Qodobada Muhiimka ah ee Khudbadda Taajka
- Qoraalka Buuxa ee Khudbadda Taajka

**Warbaahinta iyo Muuqaallada**

- Daawo Khudbadda Taajka

**Weydiimaha Warbaahinta**

Sam Blackett
sam.blackett@gov.ab.ca
587-589-6048
Xoghayaha Saxaafadda, Xafiiska Gudoomiyaha Gobolka Alberta